ARAGTIDAYADU

Waa in aan u fidinno dadka waxbarta ee luuqadahoodu ay kala duwanyiihiin galaangal loo simanyahay oo wata fursad waxbarasho oo wadajir ah; taas oo dardar galineysa isticmaalka Af-Ingriis-kooda bulsho ama tacliin ahaaneed, oo meel marinaya waxdhigasho heer fasal ah, iyo kordhinta horumarkooda guud ee lagu helayo iskaashi iyo wax - wadabarid.

Xaeysiintaan waxaa bixiyey lacagtiisa -Deeqda Xeerka 3aad ee Federaalka-Turjumid– Soomaali-7/27/2013

WARBIXINTA TURJUMAANKA

"Turjumaano ayaa u diyaar ah la xiriirka iskuulka ilmahaaga iyo wixii ku saabsan waxbarasho-diisa/deeda. Fadlan, soo wargali iskuulka haddii aad u baahantahay turjumaan."

Waxaa kale oo aan jecelnahay in aan halkaan isku kiin baro **Hormoodka Dhaqanka/Afka-Soomaaliga, Jamal Ali,** kaas oo u shaqeeya Degmada Dugsiyada ee Cherry Creek, oo door weyn ka qaata sidii uu u caawin lahaa , shaqaalha, waalidka, iyo ardeyda, oo uu had iyo jeer diyaar kuu yahy in uu ku caawiyo marka aad ballan la leedahay iskuulka ama degmada.

Masuuliyaddiisa waxaa ka mid ah:

- Turjumidda ama ka caawinta xagga Afka ingriiska, iyo isbaridda waalidka&macalimiinta wax udhiga ilmaha.
- In uu kaa caawiyo jawaab u helidda arrimaha la xiriira nidaamyada iyo xeerarka degmada, iskuulka, tacliinta, iyo waxyaabaha iskuulku kaa filanayo in add hirgalisid, iyo dhaqanka.
- Xiriirinta danahaaga/baahidaada ee ku aaddan iskuulka iyo degmada.
- Iskudubbaridida kulamada macalimiinta iyo waalidiinta ee ku saabsan hawlaha habdhaqanka, soo xaadiridda, waxbarashada khaaska ah, tacliinta-guud iyo wixii kale ee su'aalo ah ee aad dooneyso in lagaa caawiyo. Fadlan la soo xiriir:

Jamal Ali, Hormoodka Dhaqanka/Afka-Soomaaliga, ee Degmada Dugsiyada Cherry Creek Taleefoon: (720) 554-5650

Degmada Dugsiyada Cherry Creek

ELA

Hanashada Afka-Ingiriiska



Art By: Ruth Lucas

Dedicated to Excellence

Cherry Creek Schools

720-554-5650

Updated: July 2013

WAA MAXAY ELA?

Hanashada Luuqadda Ingriiska (ELA) waa barnaamij loo sameeyey in uu siiyo tacliin dheeri ah iyo caawinaad luuqad ahaaneed ardeyda ay soo koreyso kuhadlkooda (hanashadooda) afka ingriiska . Ku takhasusaha (Macalinka) ELA wuxuu kaashadaa oo ama –wax la baraa macalimiinta casharada sida xisaabta, cilmiga-seyniska, cilmiga bulshada, iyo maadooyin kale, si ardeyda loo siiyo marin ay ku helaan chasharro heer fassal ah , oo ay la qaadanayaan kordhinta af-ingriiska. Macalimiinta ELA waa kuwo si kufilan ugu hadla Afka-Ingiriiska oo si khaas ah loogu soo tabobaray in ay wax u dhigaan ardeyda baraneysa Afka-Ingriiska.

Xaafiiska Maareeyaha ELA
Hufnaan & Sinnaan
Xarunta Taakuleynta Waxbarista (ISF)
5416 S. Riviera Way
Centennial, CO 80015
Phone: 720-554-5035
http://www.cherrycreekschools.org/ExcellenceEquity/ELA/Pages/default.aspx

Dedicated to Excellence
Cherry Creek Schools

SU'AALAHA BADANAA LA ISWEYDIIYO?

SIDEE LAGU GARTAA ARDEYGU IN UU YAHAY MID BARANAYA AFKA INGIRIISKA?

marka ay joogaan waxaa la siiyaa imtixaanka gobolka ee Meeleynta iyo Hanashada Luuqadda Ingriiska (W-APT), si looga go'aan gaaro heerka uu le'egyahay ku haldalka Af-ingriiska ee ardeyga.

Waxaa dheer imtixaankaas, tijaabooyin kale oo lagu eegayo in ardeygu uu intifaacsankaro caawinaadaha kale ee dheeriga ah ee barashada Af-Ingiriiska, oo ay ku jiraan u kuurgalka fasalka, imtixaanada, iyo leyliyada iskuulka.

ELA-SIDEE U TAAKULEYSAA BAAHIDA QOFKA BARANAYA LUUQADDA INGRIISKA?

Inkasta oo ardey walba xeerkiisa caawinaad ahaaneed uu la'ekaandoono baahidiisa shakhsi ahaaneed, haddana waxa ay Barnaamijyada ELA u fidinayaan taageero luuqadeed oo garab socota chasharada heer fasal .Ardeyda baraneysa Luuqadda Ingriiska waxa ay hanadoonaan af-ingriiska, iyo ka qeyb-qaadasho waxbarasho da'da ku habbon oo kuna cabbiran meekhaan (heer) gobol ah.

Hadafka ugu horeeya ee baridda Af-Ingriiska ee casharada dhexdooda lagu dhigo, waa in uu noqdo mid gaarsiisan illaa heer fasal oo meelmarineya manhajka tadiinta, iyo sidii ay u helilahaayeen ardeydu Hanashada Afka-Ingiriiska oo darajo walbo gaarsiisan.

QOFKA BARANAYA AF-INGRIISKU MA QAADAN KARAA BARNAAMIJYO KALE OO WAXBARASHO?

Kuwa baranaya Af-Ingiriisku waa u leeyihiin galaangal/marin barnaamijyada jkale ee jira oo dhan ee ay dagmadu bixiso.

SIDEE BUU QOFKA AF-INGIRIISKA PARTAA UGABAXAA BARNAAMIJKA-

Kolka ardeyga lagu arko hanashada ku hadalka af-Haddii uu ku baaso Imtixaanka Luuqadda ee Gobolka iyo kan lagu eegayo heerka laqabsiga casharada fasalka, waxaa loo aqoonsanayaa ardeyga in uu yahay mid uu ku filanyahay Af-Ingiriiskiisu. Xagga horumarka ardeyga ee Af-Ingiriiska iyo casharada dhigaalkoodaba waxaa loo kuurgalayaa muddo dhan 2 sano, si loo hubiyo in ardeygu uu joogteeyey hanashada ku haldalka Af-Ingriiska. Markii la raaco muddadaas ukuurgalka ah, ayaa ardeyga si sax ah looga saarayaa barnaamijka taakuleynta ELA. Haddii ardeygu wali u sii baahanayahay caawinaadda ELA, inta muddada 2da sano uu ku jiro, iyo wixii ka baxsan, ardeygu waa geli karaa barnaamijka taakuleynta ELA mar kele.

WAA MAXAY XUQUUQDA WAALIDKU LEEYAHAY?

Haddi waalidiintu go'aansadaan in ay diidaan barnaamijka caawinta ah ee ELA, waxa ay raacayaan nidaamka kaaftoonka. Sanad walba waa la cusbooneysiiyaa ka kaaftoonka ELA.

Waalidku waxa uu xaq u leeyhay in uu joojiyo ka kaaftoonka marka uu rabo, oo uu doorto in uu dib u helo barnaamijka caawinta ELA. Xilliga uu ku jiro muddada ka kaaftoonka, ardeyga waxaa loo tixgalinayaa in uu wali yahay ardey baranaya af-Ingiriiska, horumarkiisa waa lala soconayaa oo waa loo kuurgalayaa.

Sida sharciga gobolku waajibiyey, Degmada Dugsiyada ee Cherry Creek waxa ay Iskuulka dhexdiisa uga qaadeysaa ardeyda barata Af-Ingiriiska, dhammaantood, oo ay ku jiraan kuwa horey uga kaaftoomay ELA, Imtixaanka Gobolka ee loo yaqaan Baaraandegga Hanashada Afka Ingiriiska.